Daraasad ku sameynta Gaadiidka Dadweynaha ee West Broadway (Galbeedka)

Ujeedada

Ujeedada daraasadda Galbeedka Broadway waa in la sameeyo qorshe guud oo lagu garanayo caqabadaha hor yaal gaadiidka iyo in qiimeyn lagu sameeyo horumarinta gaadiidka waqooyiga ee ku dhereran Galbeedka wadada Broadway ee Waqooyiga Minneapolis. Taas waxaa ka mid ah qiimeynta isku xirka ee Khadka Buluugga ah ee METRO (Bottineau LRT) ee laga yaabo in laga hirgeliyo Golden Valley iyo Robinsdale. Daraasaddu waxa ay qiimeyn ku sameyneysaa khadka higelinta ee mustaqbalka (TOD).

Hababka/Isbedelka

Wadooyinka gaadiidka iyo kuwa basaska waxaa jira laba hab oo qiimeyn loogu sameyn karo daraasadda. Daraasaddu waxa ay xoogga saareysaa is waafajinta Galbeedka wadada Broadway iyo wadada Pen ee faras magaalaha iyada oo laga soo galayo Galbeedka roadway iyo Wadada Washinton ama Waqooyiga Wadada Labaad. Daraasaddu waxa kale oo qiimeyn ku sameyneysaa isku xirka iyo mustaqbalka METRO Blue Line oo la sii gaarsiiyey xarumaha basaska laga raaco ee Galbeedka.

Natiijada La Filayo In Ay Ka Soo Baxdo

Natiijada la filayo in laga gaaro waa talo soo jeedin ku saabsan Siyaabaha Ay Doorbidayaan Dadka Degaanka (LPA) ee horumarinta khadka gaadiidka dadweynaha. Iyada oo laga duulayo ka qeybgalka bulshada, dajiyayaasha nidaamka waxa ay dooranayaan habka ugu haboon (LPA) ee ugu haboon inuu daboolo baahida gaadiidka ee bulshada ku nool degaanka marka lala barbardhigo kharashaka iyo faa'iidada laga gaarayo, iyo raadka iyo dhiirigelinta uu ku yeelanayo horumarinta gaadiidka.

Waa maxay jadawalka daraasadda goorma ayase go'aan laga gaarayaa habka ugu haboon ee degaanka (LPA).

Daraasadda gaadiidka dadweynaha ee Galbeeka Broadway waxa ay mareysaa afar marxaladood:

- Garashada dhibaatooyinka gadiidka iyo daraasad lagu horumarinayo
- Garashada hababka kale iyo nidaamka lagu wada shaqeynayo
- Qiimeynta Hababka kale
- Soo gudbinta daraasadda gaadidka ee ugu dambeys iyada oo la raacinayo talo soo jeedinta habka ugu haboon ee la doior bidayo (LPA) ee adeegga gaadiidka iyo horumarinta gaadiidka dadweynaha.

2015 HAWLAHA AASAASKA AH EE LA FULINAYO

ABRIL
- Ra'yiga dadweynaha ee ku jeeda horumarinta gaadiidka ee Galbeedka Broadway

SITEEMBAR
- Dadweynaha oo loo soo bandhigo natiijada daraasadda

DISEEMBAR
- Ra'yiga dadweynaha ee ku jeeda habka ugu haboon gaadiidka ee ay ku talinayaan gudiga maamulka
- Talo soo jeedinta gudiga maamulka




Ka qeybgalka bulshada waxa ay xoogga saareysaa wadaagista macluumaadka gaadiidka sida goobaha dadku ku kulmo sida Suuqa Beeraleyda ee Galbeedka Broadway.



Daraasaddu waxa ay kala shaandheyn ku sameyn doontaa daraasadda horey loo sameeyey iyo qorshe lagu hirgelinayo googo gaadiid oo cusub sida Xarunta Gaadiid Dadweynaha ee Robinsdale (sawirka)

West Broadway Study Area

Updated March 2015



For more information:
Shelley Miller
WestBroadway@metrotransit.org
612-341-5668

Metro Transit